

## Xaashida Xaqiiqda Tallaalka COVID-19 Bulshada Mudnaanta leh iyo Qaybinta Tallaalka

Ohio waxay bilawday inay u qaybiso tallaalo badbaado leh, waxtar leh oo COVID-19 gobolka oo dhan dadka doorto in la tallaalo. Hannaanka soosaaridda tallaalka COVID-19 waxa kujira tallaabooyin u dhigma kuwa loo isticmaalay soosaaridda tallaalada hore, sida tallaalka hargabka ama jadeecada. Maaddaama tallaalada COVID-19 ay mareen hannaanka dhammaystiran si ay uga helaan oggolaanshaha isticmaalka xaaladda gurmadka ah Maamulka Cuntada iyo Daawada, gobolku wuxuu bilaabay si xeeladaysan oo caqli ku dhisan inuu u qaybiyo tallaalada dadka reer Ohio ee halista ugu badan kujira. Qaybinta waxa hagaya talooyin ka socda Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC), Guddida La-talinta ku Aaddan Dhaqamada Tallaalka (Advisory Committee on Immunization Practices (ACIP)) iyo Akadamiyada Qaran ee Sayniska, Injineerinka, iyo Caafimaadka (National Academies of Sciences, Engineering, and Medicine (NASEM)).

### Qaabka Wajiyada leh ee Ohio

Yoolalka Ohio way cad yihiin: Si nololo loo badbaadiyo ardayduna dugsiyada ugu soo laabtaan. In kastoo qaddarka tallaalka ee la heli karo uu kooban yahay, Ohio waxay raaci doontaa qaabka wajiyada badan si tallaalka loo bixiyo. Wajiga tallaalka ee koowaad, mudnaan waxa la siin doonaa shakhsiyaadka halista ugu sarraysa ugu jira, iyo sidoo kale shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee daruuriga ah iyo shaqaalaha daryeelka bukaanada qaba COVID-19. Xawaaraha ay Ohio ay wajiyada ku dhaqaajin doonto wuxuu si aad ah ugu xiran yahay xaddiga tallaalka ee la heli karo. Marka tallaalka la heli karaa uu kordho, tallaalada COVID-19 waxa heli doona dhammaan dadka reer Ohio ee doorta in la tallaalo.

- **Wajiga 1 (Qaddarku Kooban Yahay)** –Tallaalka inta la heli karo waa kooban tahay waxaana kaliya heli doona bulsho-wayn uu muhiim u yahay oo gaar ah. Ohio waxay diiradda saari tallaalka dadka halista ugu badan kujira, iyo sidoo kale shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee daruuriga ah iyo shaqaalaha daryeelka bukaanada qaba COVID-19.
- **Wajiga 2 (Qaddarku waa Kordhayaa)** –Jiritaanka tallaalku waa kordhayaa waxaana la siin karaa dad badan oo ka tirsan bulsho-wayn uu muhiim u yahay oo gaar ah kuwaasi oo doorta in la tallaalo.
- **Wajiyada 3-4 (Si Ballaaran loo Heli Karo)** –Marka tallaalka si ballaaran loo heli karo, Ohio waxay sii wadi doontaa inay si xeeladaysan u tallaasho dadka reer Ohio haddii ay doortaan inay tallaalka qaataan.

### Wajiga 1A

Muddada Wajiga 1A, kaasi oo bilaabmay Diisambar 14, 2020, mudnaanta waxa la siiyey shakhsiyaadka nugal ee ku nool meel isku dhawdhaw iyo kuwa iyaga daryeela:

- Shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha sida joogtada ugu lugta leh daryeelka bukaanada qaba COVID-19.
- Degganayaasha iyo hawladeenada guryaha xannaanada dadka waayeelka.
- Degganayaasha iyo hawladeenada xarumaha nolosha la taageero.
- Bukaanada iyo hawladeenada ku sugan isbitaalada waalida ee gobolka.
- Dadka leh naafooyinka koboceed iyo kuwa dhimirka wax ka qaba, oo ay kujiraan kuwa daroogada isticmaala, kuwa ku nool guryaha dadka badan ku nool yihiin, goobaha la deggan yahay, ama xarumaha, iyo hawladeenada ku sugan goobahaas.
- Degganayaasha iyo hawladeenada ku sugan labada guri ee gobolku maamulo ee ciidamada hawlgabka ah ee Ohio.
- Gargaarayaasha EMS.

### Wajiga 1B

Muddada Wajiga 1B, wali waxa sii socon doona in diiradda la saaro ilaalinta dadka halista sare kujira iyo in ardayda fasalada K-12 ay ku laabtaan fasalada Maarso 1. Wajigan waxa si gaar ah ugu jiri doona:

- Dadka reer Ohio, da'da 65 iyo ka sarreeya.
- Dadka reer Ohio ee leh xaalad daran oo lagu dhasho, koboceed, ama xaalado xilli hore bilaabma, iyo kuwo la dhaxlo oo ay kujiraan cerebral palsy; spina bifida; cudurka wadnaha ee lagu dhasho oo daran oo u baahday in qofka isbitaal la dhigo sanadkii tagay gudhihiisa; nooca sonkorowga 1 ee daran oo u baahday in isbitaal la dhigo sanadkii tagay; xaaladaha falgalka kiimikaad ee jirka ee la dhaxlo oo ay kujirto phenylketonuria; xaaladaha neerfeed ee daran oo ay kujiraan epilepsy, hydrocephaly, iyo microcephaly; xaaladaha hidde-side ee daran oo ay kujiraan Down syndrome, fragile X syndrome, Prader-Willi syndrome, Turner syndrome, iyo muscular dystrophy; cudurka sambabka ee daran, oo ay kujiraan xiiq u baahatay in qofka isbitaal la dhigo sanadkii tagay, iyo cystic fibrosis; sickle cell anemia; iyo alpha iyo beta thalassemia; iyo bukaanada la galiyey xubnaha muhiimka ah. Haddii dadku rumaysan yihiin inay kujiraan kooxdan, waa inay la xiriiraan guddida deegaankooda ee naafooyinka koboceed, taasi oo ka caawin doonta agaasinka tallaalada.
- Dadka qaangaarka ah/shaqaalaha ku sugan dugsiyada K-12 ee raba inay ku laabtaan, ama inay ku sii jiraan, qaababka waxbarashada fool-ka-foolka ah ama isku dhafan.

Tallaalada Wajiga 1B wuxuu bilaabmay toddobaadkan Janaayo 19. Badhasaab DeWine wuxuu ku dhawaaqay nidaam darajooyin leh oo ku aaddan siinta tallaalada dad lagu qiyaasay 2.2 milyan kuwaasi oo mutaystay tallaalka wajigan, laga bilaabo dadka da'dood tahay 80 ama ka wayn tahay. Marka koox da'eed cusub ay bilaabanto, tallaalka waxa dhici karta inaan loo dhammayn koox da'eedkii hore. Waxay qaadan doontaa dhawr toddobaad qaybinta dhammaan tallaalka marka la eego qaddarka tallaalka yaala oo kooban.

- Janaayo 19, 2021 - Dadka reer Ohio ee da'doodu tahay 80 iyo ka wayn.
- Janaayo 25, 2021 - Dadka reer Ohio ee da'doodu tahay 75 iyo ka wayn; dadka qaba naafada koboceed ama garasho **IYO** mid kamid ah xaaladaha: cerebral palsy; spina bifida; cudurka wadnaha ee lagu dhasho oo daran oo u baahday in qofka isbitaal la dhigo sanadkii tagay gudhihiisa; nooca sonkorowga 1 ee daran oo u baahday in isbitaal la dhigo sanadkii tagay; xaaladaha falgalka kiimikaad ee jirka ee la dhaxlo oo ay kujirto phenylketonuria; xaaladaha

neerfeed ee daran oo ay kujiraan epilepsy, hydrocephaly, iyo microcephaly; xaaladaha hidde-side ee daran oo ay kujiraan Down syndrome, fragile X syndrome, Prader-Willi syndrome, Turner syndrome, iyo muscular dystrophy; cudurka sambabka ee daran, oo ay kujiraan xiiq u baahatay in qofka isbitaal la dhigo sanadkii tagay, iyo cystic fibrosis; sickle cell anemia; iyo alpha iyo beta thalassemia; iyo bukaanada la galiyey xubnaha muhiimka ah. Haddii dadku rumaysan yihiin inay kujiraan kooxdan, waa inay la xiriiraan guddida deegaankooda ee naafooyinka koboceed, taasi oo ka caawin doonta agaasinka tallaalada.

- Febraayo 1, 2021 - Dadka reer Ohio ee ah 70 jir iyo ka wayn; shaqaalaha dugsiyada K-12 ee raba inay sii joogaan ama ku laabtaan qaababka fool-ka-foolka ama isku dhafan ee waxbarashada ah.
- Febraayo 8, 2021 - Dadka reer Ohio ee da'doodu tahay 65 iyo ka wayn.
- Febraayo 15, 2021 –Dadka reer Ohio ee leh xaalad daran oo lagu dhasho, koboceed, ama xaalado xilli hore bilaabma, iyo kuwo la dhaxlo oo ay kujiraan erebral palsy; spina bifida; cudurka wadnaha ee lagu dhasho oo daran oo u baahday in qofka isbitaal la dhigo sanadkii tagay gudihiisa; nooca sonkorowga 1 ee daran oo u baahday in isbitaal la dhigo sanadkii tagay; xaaladaha falgalka kiimikaad ee jirka ee la dhaxlo oo ay kujirto phenylketonuria; xaaladaha neerfeed ee daran oo ay kujiraan epilepsy, hydrocephaly, iyo microcephaly; xaaladaha hidde-side ee daran oo ay kujiraan Down syndrome, fragile X syndrome, Prader-Willi syndrome, Turner syndrome, iyo muscular dystrophy; cudurka sambabka ee daran, oo ay kujiraan xiiq u baahatay in qofka isbitaal la dhigo sanadkii tagay, iyo cystic fibrosis; sickle cell anemia; iyo alpha iyo beta thalassemia; iyo bukaanada la galiyey xubnaha muhiimka ah. Haddii dadku rumaysan yihiin inay kujiraan kooxdan, waa inay la xiriiraan guddida deegaankooda ee naafooyinka koboceed, taasi oo ka caawin doonta agaasinka tallaalada.

Dadka qaadanaaya tallaalka waxa waajib ah inay ahaadaan 16 jir ama ka wayn si ay u mutaystaan tallaalka Pfizer, iyo 18 jir ama ka wayn si ay u mutaystaan tallaalka Moderna. Guddiyada deegaanka ee naafooyinka koboceed ayaa la xiriiri doona shakhsiyaadka buuxiyey shuruudaha mutaysiga si ay ugu diyaariyaan tallaalada. Guddiyadani waxay kala shaqayn doonaan isbitaalada carruurta iyo waaxaha caafimaadka deegaanka qaarkood muddaynta. Kaliya shakhsiyaadka ka tirsan bulsho-waynta ee la shaqeeya guddida naafooyinka koboceed ee deegaankooda ayaa mutaysan doona tallaalka markan.

### Sida Loo Helo Bixiye Tallaal

Dadka reer Ohio waa inay eegaan websaytada waaxaha caafimaadka deegaankooda iyo EMAs si ay wax badan uga ogaadaan tallaalada bulshadooda ka jira ama si ay iskugu diiwaangaliyaan inay wixii soo kordha ka helaan waaxda caafimaadka deegaanka. Kooxo ay da'du qeexday waxay ka heli doonaan tallaalka waaxaha caafimaadka deegaankooda, isbitaalada, xarumaha caafimaadka ee fadaraalku aqoonsan yahay, iyo sidoo kale farmasiyada tafaariiqda qaarkood. Bixiyayaasha loogu talagalay dadka kale wali lama shaacin. Baaritaanka Goobaha Bixiyaha Tallaalka ee gobolka oo dhan waxaad ka heli kartaa [vaccine.ohio.gov](https://www.ohio.gov/vaccine), isagoo u saamaxaya dadka reer Ohio inay ku baaraan calaa degmo, iyo ZIP code si ay u helaan bixiye aaggooda ah si uu tallaalka u siiyo.

### Wajiyada Mustaqbalka

Qorshaha qaybinta tallaalka ee bulsho-waynta mudnaanta leh ee mustaqbalka wali hawshiisa ayaa la wadaa waana la shaacin doonaa markii la gunaanado. Marka macluumaad dheeraad ah uu diyaar noqdo kaasi oo ku aaddan cidda heli karta tallaalka iyo goorta ay heli karaan, waxaanu uga gudbin doonaa macluumaadkan si caam ah warbaahinta wararka waxaananu soo dhigi doonaa [coronavirus.ohio.gov/vaccine](https://www.ohio.gov/vaccine).

Tallaalka waxa la caddeeyey inuu ka hortagayo COVID-19 iyo inuu yaraynayo darnaanshaha xanuunka ee dadka qaada fayraska cudurka keena. Tallaalidda qayb badan oo dadka reer Ohio ah waxay caawin doontaa kahortagga isbitaal dhigidda halis ah iyo dhimashada.

Isticmaalidda dhammaan agabka jira ee caawiya kahortagga faafidda fayraska wali waxay sii ahaan wax muhiim ah ilaa tiro badan oo dadka reer Ohio ah la tallaalo. Sii wadista xirashada afsaabyada daboolaa afka iyo sanko iyo kala fogaanshaha dadku waxay yarayn doonaan fursadda inuu qofku u baylaho ama faafiyey fayraska. Tallaabooyinka kahortagga ee saxda ah, oo uu ku lammaan yahay tallaalku waxa laga heli doonaa difaaca ugu wanaagsan ee COVID-19.

*La cusboonaysiiyey Janaayo 20, 2021.*

Macluumaad dheeraad ah, booqo [coronavirus.ohio.gov](https://www.ohio.gov/vaccine).

Jawaabaha su'aalaha aad ka qabto COVID-19, wac 1-833-4-ASK-ODH (1-833-427-5634).

**Caafimaadkaaga maskaxdu wuxuu u muhiim yahay sida caafimaadka jirkaaga. Haddii adiga ama ehelkaagu aad waajahaysaan walaac la xiriira aafada koronafayras, caawimo ayaa diyaar ah 24 saac maalintii, toddobada maalmood toddobaadkii. Wac COVID-19 CareLine 1-800-720-9616.**

**Macluumaad dheeraad ah, booqo:**